# FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 30 Juunyo 1983 L.2R6

**FAAFINTAN BIL KOO BAXA** جريدة شهرية


**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

**QIIMAHA [illegible] KUKUNKA: [illegible] waa Shs. 150 [illegible] Shs. 300 [illegible] 1 Janaayo [illegible] Faafinta Rasmiga ah [illegible]**

**K O O B N I I N**

**QAYBTA** **KOOWAAD**


S H A R C I

SHARCI L. 10 ee 29 Maajo 1983, Dhismaha Mashruuca Khayraadka Badda. Bogga 379

QAYBTA LABAAD

X E E R

W. M.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/le Maxamed Xasan Cilmi L. 249 » 388

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/le Khaliif Cali Cigaal L. 250 » 389

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/le Khtdiija Awow Munye Bi shaaro L. 251 » 390


**Wakaaladda M. Qaranka**

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/le Nimco Cabdi Guuleed L. 252 » 391

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/le Jirde Xuseen E Co L. 253 » 392

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul Jaalle Maxamed Cismaan Cabdi » 393

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado L. 254 » 394

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul Jaalle Faaduma Maxamed Cosoble L. 255 » 395

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/le Axmed Qalaf Jaamac L. 256 » 396

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul Jaalle Guuleed Cabdi L. 257 » 397

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul Jaalle Maxamed Yuusuf Cabdulle L. 258 » 398

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/le Muusee Nadiif Allaale L. 259 » 399

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/le Saciid Xuseen Cali L. 260 » 400

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul Jaalle Jamaal Axmed Yuusuf L. 261 » 401

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul Jaalle Cabdulle Seet Jaamac iyo Xaliimo L. 262 » 402

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul J/leFaaduma Xaashi Nuur L. 263 » 403

WASAARADDA H. GUUD 4.1.81, Naado Dhul Jaalle Shirkadda Caabi L. 264 » 404

WASAARADDA H. GUUD 4.6.83, Naado Dhul Jaalle Cadar Cali Aadan L. 27 » 405

WASAARADDA H. GUUD 4.6.83, Naado Dhul Jaalle Sacad Maxamed Cabdal la L. 28 » 406

WASAARADDA H. GUUD 4.6.83, Naado Dhul J/le Saalax Saalim Saciid L. 29 » 407

DHISMAHA ISKAASHATADA D) YMO DHEER OO » 408

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6.6.83, Lumid Buug Kayd L. 6426 ku qoran Shugri Aadan Shire L. 265 » 409

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 9.6.83, J. War. Lumid L. 2591 ku qoran Jaamac Guuleed Aadan L. 266

## QAYBTA KOWAAD

## S H A R C I

Sharci Lambar 10 taariikh 29 Maajo 1983 Dhismaha Mashruuca Khayraadka Badda.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1aad

### Dhismaha Mashruuca Khayraadka Badda

1. Sharcigan waxaa lagu dhisay Mashruuca Khay raadka Badda oo hadda kaddib lagu magacaabi doono «Mashruuca».

2. Mashruucan wuxuu yeelan doonaa Shakhsiyad qaanuun ah iyo awood dhaqaale ee Madax banaan, laga bilaabo 1da Jannaayo 1982.

### Qod. 2aad

### K o r m e e r

1. Waxaa Mashruuca hantidiisa gebi ahaan leh Dawladda J. D. S. Waxaana hawlihiisa kormeeri doona Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga, lagumana dhiqi doono Sharciga lambarkiisu yahay 17 ee 21.4.74

2. Sharciga lambarkiisu yahay 16 ee bishii Abriil 1970kii ee lagu maamulo Hantidhowrka Wakaaladaha madaxa bannaan, Warshadaha, Hay'adaha Ganacsiga iyo Bunuugta Dawladdu qeyb ku leedahay, ayaa lagu dhaqayaa Mashruuca, haddii aan Sharcigan si ka duwan tilmaamin.

### Qod. 3aad
### Xarunta Dhexe ee Mashruuca

Xarunta Dhexe ee Mashruuca waa Kismaayo, wu xuuna laamo iyo Xafiisyo ka furan karaa meelihii kale oo uu u arko inay ganacsigiisa dan u yihiin, kuwaasoo noqon kara Degmooyinka iyo Gobollada J. D. S. Iyo Dalalka Dibadda.

Qod. 4aad

Ujeeddooyinka

Ujeeddooyinka Mashruuca waxay yihiin:

b) Inuu u fidiyo shirkadaha la soo xulay iyo dadka kalluumeysatada ah dhismooyin iyo qalab ay u adeeg sadaan habeynta iyo keylinta Khayraadka Badda, si loogu iibiyo Dalka gudihiisa iyo Duunyada dibadda.

t) Inuu hagaajiyo heerka dhaqan dhaqaale ee bee laha Kalluumeysatada la soo xulay iyadoo la siinayo qalab ay kaga shaqaystaan xeebaha, loona sameeynayo suuq joogto ah oo ay ku gataan khayraadka ay la soo baxaan, si loo kordhiyo wax soo saarkooda.

j) Inuu kordhiyo dhiirina geliyo cunista Kalluunka Dalka gudihiisa, isagoo si joogta ah suuqa looga helo Kalluun tayo leh laguna iibiyo sicir suuragal ah.

x) Inuu kordhiyo Dakhliga lacgta adag ee laga helo dhoofinta khayraadka Badda, isagoo u habeynayo una kadayn doona heer caalami ah una suuqyada u iib geliyo sida ganacsiga ku habboon.

Qod. 5aad

Awoodda Maamulka Mashruuca

Mashruucu wuxuu yeelan doonaa awoodda soo socota:

b) Inuu ku dhaqaaqo hawlo ganacsi Kalluumeysi oo isugu jira qabashada, gadidda, dhoofinta habeynta iyo suuq gelinta khayraadka Badda, nooc kastaba ha ahaadeene, iyadoo la raacayo sharciyada u degsan kha yraadka Badda, haddii aan sharcigani si ka duwan til maamin.

t) Inuu qorto shaqaalaha uu u baahan yahay, isa goo tixgelinaaya waqtiga iyo baahida uu u qabo shaqaa lahaas iyo hadba siduu Guddiga Agaasinka u arko inay dan tahay, iyadoo aan la cuskanin sharciga lambarkii su yahay 36 ee 22.4.72 oo ku saabsan shaqo qorista iyo qaabka shaqaalanimo ee hay'adaha madax bannaan.

j) Inuu qorto abaalmariyana khuburo iyo hay'ada ha kale iyadoo loogu daneynayo hawl fulinta Mashruu ca, taasoo la xiriirta sugidda iyo fulinta ujeeddada ka mid ah ujeeddooyinka Mashruuca.

x) Inuu guud ahaan iibsado, kireysto ama wax kale ku doorsado, qalab ama hantida guurtada ama ma guurtada ah oo looga baahan yahay socodsiinta hawla ha Mashruuca.

kh) Inuu guud ahaan xuquuq amase daw u yeelan karo wuxuu Guddiga Agaasinka u arko lagama maarm aan amase dan u ah ujeeddooyinka Mashruuca.

d) Inuu iibiyo, hagaajiyo, hore u mariyo kireeyo dooriyo, rahanto, ama uu dhammeystiro amase qeyb ka mid ah hantida iyo xuquuqda ganacsi oo Mashruuca siduu hadba Guddiga Agaasinka u arko inay tahay.

r) Inuu la galo qandaraasyo, heshiisyo ama iskaa shi Dawlado ama hay'ado (Dawladda Hoose iyo kuwa kale oo la mid ah) ama shirkado ama dad kasta oo ad duunka ka mid ah.

s) Inuu abuurto hanti lacageed oo lagu fulinayo ujeeddooyinkiisa, taasoo ka iman karta dakhliga Mash ruuca ama amaah lagu qaato oggolaanshha Guddiga Agaasinka.

sh) Inuu ku isticmaali karo, oggolaan karo aqbali karo, dhimi karo, sameyn karo kuna dhaqmi karo Jee gag iyo warqadaha lacagaha la isku dhafsado.

dh) Inuu Bankiyada Dalka iyo Dibaddaba ka fu ran karo xisaab socota, haddii uu Guddiga Agaasinka u arko lagama maarmaan.

c) Inuu lacag amaahin karo macaamishiisa gaar ahaaneed ama Ururo, haddii ay ballan qaad ama laga hayo lamaanad.

g) Inuu aruursado sheegtana lacag kastoo uu lee yahay ama deyn looga qabo.

f) Inuu sameeyo wax kastoo lagu horumarinayo iskaashatooyinka Mashruuca.

Qod. 6aad

Helidda Alaabta Cayriin

Mashruucu wuxuu alaabta Cayriin ka helayaa Is kaashatooyinka Kalluumeysiga oo ka iibin doona waxay soo saaraan Mashruuca hadduu sicirku la mid yahay kan suuqa.

Canshuur dhaafka iyo u danayn Mashruuca

Qod. 7aad

1. Dawladda iyadoo u danaynaysa Mashruuca, wa xay ka dhaafaysaa muddo shan sano ah Canshuurta iyo kharajyada hoos ku xusan.

b) Canshuurta soo dejinta iyo dhoofinta.

t) Macaashul Macaashka.

2. Dawladda waxay Mashruuca ka dhaafaysaa muddo ku siman shan sano canshuurta dakhliga iyo ma caashka laga billaabi 1da Jannaayo 1982.

Qod. 8aad

xubnaha iyo dhismaha Mashruuca

1. Mashruucu wuxuu yeelan doonaa qaab dhismo ha hoos ku tilmaaman.

b) Guddi Agaasin.

t) Guddoomiye.

j) Maareeye Guud.

x) Kaaliye Maareeye Guud.

Xubnaha ka mid noqonaya Guddiga Agaasinka iyo hawlahoodaba waxay ku qeexan yihiin Qodobada soo socda.

Qod. 9aad

Guddiga Agaasinka

1. Guddiga Agaasinka ee lagu tilmaamay Qod. 8aad ee sharcigan wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

1) Wasiirka Kalluumeysiga
— Guddoomiye

11) Maareeyaha Guud ee Mashruuca
— Xubin

111) Wakiil ka tirsan Wasaaradda Kalluunka
— Xubin

vi) Wakiil ka tirsan Bankiga Ganacsiga
— Xubin

v) Wakiil ka tirsan Wasaaradda Ganacsiga
— Xubin

2. Xubin kasta oo hay'ad ka wakiil ah waxaa magacaabaya Wasiirka Kalluumeysiga, isagoo raacaya tilmaanta hay'adda uu wakiilka ka yahay.

3. Shirka caadiga ah ee Guddiga Agaasinka waxaa la isugu imaanayaa ugu yaraan laba jeer sanadkiiba, hase ahaatee, qabashada fadhiyada aan caadiga ahayn waxaa cadayn kara xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Agaasinka.

4. Qabashada shirarka waxaa ogeysiinaya xubnaha Guddiga Agaasinka, Maareeyaha Guud, kaddib markuu la tashado Guddoomiyaha, isagoo ku gaarsiinaya warqad, ugu yaraan laba toddobaad shirka ka hor.

5. Xubin kastat ee Guddiga waxay leedahay hal cod xubin go'aankana waxaa lagu gaarayaa aqlabiyad sahlan. Haddiise cododka oggolaanshaha iyo kuwa diid madu ay isla ekaadaan, waxaa dhaqan gelaya cod bixinta uu raaco Guddoomiyuhu.

6. Go'aanka Guddiga Agaasinka ma ansaxayo, haddii aan go'aankaas lagu gaarin fadhi ay ka soo qeyb galeen ugu yaraan saddex xubnood.

7. Guddiga Agaasinka marka laga reebo Maareeyaha Guud ee Mashruuca, wuxuu xaq u leeyahay gunno fadhi, taasoo uu cadaddeeda oggolaan doono Wasiirka Kalluumeysiga, isagoo tixgelinaya talada Guddiga Agaasinka.

8. Hadal qoraalka shirarka Guddiga Agaasinka wuxuu noqonayaa afka raamiga ah ama Ingiriiska.

Qod. 10aad

Mas'uuliyadda Guddiga Agaasinka

b) Guddiga Agaasinka wuxuu mas'uul ka yahay inuu dejiyo siyaasadda guud ee ku saabsan hawsha iyo ujeeddooyinka Mashruuca ee lagu xaqiijinayo hirruma rkiisa.

t) Inuu go'aamiyo miisaaniyadda sanadka oggo laadana xisaabaadka sanadka.

Qod. 11aad

Muddada Xilka Guddiga Agaasinka

Gubnaha Guddiga Agaasinku waxay xilka hayna yaan muddo dhan laba sano, laga bilaabo taariikhda la magacaabay. Xubnaha dib waa loo soo dooran karaa muddo kale, waxayna ku xiran tahay oggolaanshaha iyo go'aaminta hay'adaha ku shaqada leh ee lagu tilmaa may faqradda 2aad ee Qod. 9aad ee sharcigan.

Qod. 12aad

Magacaabidda Saraakiisha Mashruuca

1. Maareeyaha Guud waxaa lagu magacaabayaa Xeerka MadaxweynahaJ. D. S. Iyadoo Madaxweynuhu tixgelinayo talada Wasiirka Kalluumeysiga.

2. Madaxda qaybaha shaqada ee Mashruuca, wa xaa u magacaabaya hawlahooda, iyadoo la tixraacayo qodobka 5aad, xarafkiisa (b) ee sharcigan, Guddoomi yaha Guddiga Agaasinka, isagoo tixgelinaya talada Maareeyaha Guud iyo Guddiga Agaasinka.

Qod. 13aad

Xilka Maareeyaha Guud

Mashruucu wuxuu yeelanayaa Maareeye Guud oo ah madaxa hawl fulinta Mashruuca, isagoo ku yeelana ya awood buuxda mas'uuliyadda maamuika iyo la socod

ka hal maalmeedka mashruuca oo dhammaantood lagu fulinayo siyaasadda iyo miisaaniyadda uu go'aamiyo Guddiga Agaasinka.

## Qol. 14aad

## Xisaabaadka

1. Maareeyaha Guud waxaa waajib ku ah marka uu dhammaado sanad lacageedka Mashruuca, inuu Saddex bilood gudahood uu u soo bandhigo Guddiga Agaasinka, si uu u oggolaado, warqadda dheelitirka xi saabta (Balance sheet), macaashka iyo khasaaraha (Profit iyo loss accounts), isagoo muujinaya xaaladda dhaqaale ee Mashruuua dhammaadka sanad lacageed ka iyo natiijada dhaqaale ee Mashruuca hawl qabadkii sa lagu gaaray sanadka.

2. Maareeyaha Guud ugu dambeyn bisha ugu da mbeysa sanadka rubuciisa, waa inuu u gudbiyaa warqad ku meel gaar ah ee caddeyneysa xisaabaadka faa'iida da iyo khasaaraha dheelitirkooda si uu u oggolaado, Guddiga Agaasinka.

3. Maareeyaha Guud ee Mashruuca wuxuu u gud binayaa xisaab xir sanadeedka Guddiga Agaasinka si uu u oggolaado, isagoo sii raacinaya warbixin sanadee dka lagu tifatirayo hawl qabadka Mashruuca sanadkii la soo gudbay, laguna xusay natiijooyinka ka dhashay hawlihii la soo qabtay, iyadoo la muujinayo waxtarka amase waxyeelada ka soo baxay. Warbixinta waxaa ka mid ahaan doona arrimaha soo socda:

1) Tirada Shaqaalaha iyo mushaharka la sii — yay

ii) Tiro koobka wax soo saarka

iii) Tiro koobka Jumlada

iv- Daraasad dhibaatooyinka lala soo kulmay, — meeshii lagala kulmay iyo wixii laga — qabtay.

4. Afka loo adeeganayo xisaabaadka Mashruuca wuxuu noqon doonaa afka rasmiga ah ama afka Ingiriiska.

Qod. 15aad

Hantidhowrka Xisaabaadka

Xisaab sanadeedka Mashruuca, waxaa hanti dhowraya sarkaal hantidhowre ah oo ka socda Hantidhowrka Guud ama hantidhowr uu wakiishay Guddiga Agaasinka.

Qod. 16aad

Qaab Shaqaaleedka Maamulka Mashruuca

Mashruucu wuxuu yeelan doonaa hab qaabeed shaqo iyo shaqaale oo muujinaya qeexayana waajibaadka iyo xuquuqda shaqaalaha, gaar ahaan mushaharkooda gunnooyinkooda iyo hawl gabkooda.

Qod. 17aad

Miisaaniyadda

1. Muddo aan ka badnayn saddex bilood gudahood, inta uusan dhammaan sanad lacageedka ayaa Maareeyaha Guud u gudbinayaa Agaasinka si uu u oggolaado, dakhliga iyo miisaaniyadda sanadka soo socda ee Mashruuca.

2. Guddiga Agaasinka wuxuu oggolaanayaa warbixinta xisaabadka Mashruuca, ugu dambeyn 31ka Maarso sanad kasta, taasoo loo gudbinayo Wasaaradda Maaliyadda iyadoo la raacinayo warbixin sanadeed tifatiran.

Qod. 18aad

Hantida Mashruuca

Hantida Mashruucu waxay ka koobantahay:

1. Dhammaan hantida maguurtada ah (fixed assets) iyo Guurtada (Movable Propertias) ee ay ga datay, loogu deeqay ama si sharci ah loogu wareejiyay.

2. Dhammaan lacagaha Mashruucu dhigto dalka Soomaaliya ama kuwa dibadda iyo wixii lacag caddaan ah oo uu haysto.

3. Deynta Mashruucu ku leeyahay macaamiishiisa ha ahaadeen kuwo gaar ahaaneed ama hay'ado kala duwan.

4. Wixii qalab iyo alaabooyin ah ee Mashruucu leeyahay.

Qod. 19aad

Hab lacageedka

1. Sanad lacageedka Mashruucu wuxuu bilaabana yaa 1da Jannaayo wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disembar.

2. Macaashka laga helo Mashruuca waxaa dib loo gu maal gelinayaa Mashruuca, iyodoo la raacayo go'aa nka Guddiga Agaasinka, kuwaasoo sugi doona baahida lacageed ee hawlaha Mashruucu fulinayo timaadada.

Qod. 20aad

Xeer Nidaamiye

Madaxweynaha J. D. S. ayaa awood u leh inuu Ma shruuca u soo saaro Xeer Nidaamiye, isagoo tixgelina ya talada Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga.

Qod. 21aad

Dhaqan gal

Shareecigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxii xo Madaxweynaha J. D. S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 29 Maj. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA ICO DEG. MAGAALAYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xasan Cilmi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 5.8.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihii 40X30 kuna fadhiya 1200 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga. Dhul Lamb. 486-487 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 61-62 B.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddada Balcad

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30- Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Jen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 249

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA ICO DEG. MAGAALAYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khaliif Cali Cigaal uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhduahayd 2.10.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettango lar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

| | |
|---|---|
| Waqooyi Waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 359 B. |
| Koonfur Waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 363 B . |
| Galbeed Waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i Waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 360 B. |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30- Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Jen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 250

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA ICO DEG. MAGAALAYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khadiija Awow Munye Bisharo. uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 23.4.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawlad d ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 342 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 345 B.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30- Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Jen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 251

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA ICO DEG. MAGAALAYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Nicma Cabdi Guu leed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 13.5.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Ret tangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0137 Y.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0134 Y.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30- Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Jen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 252

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA ICO DEG. MAGAALAYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jirde Xuseen ee Co. uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 19.4.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 50X50 kuna fadhiya 2500 Md.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Wadada Jasiira Xamar

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 3 W.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahan iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30- Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Jen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 253

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA ICO DEG. MAGAALAYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cismaan Cabdi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 12.2.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0412 Y.

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0411 Y.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30- Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Jen. 1981

AGASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 254

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Maxamed Cosoble uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 5.5.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAS:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 864 Y.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 865 Y.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 255

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Nuur Qalaf Jaamac uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd ——— uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihii 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAS:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 331 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 335 B.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 332 B.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 256

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Guuleed Cabdi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd ——— uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna yahay Tarbesiyo Addimihiisuna yihiin 20+4X25 kuna fadhiya 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAS:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 257

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

### NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Yuusuf Cabdulle uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20.5.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAS:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 005 Y.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 1020 Y.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 258

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muuse Nadiif A-laaale uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 15.11.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna ya hay Trabeesiyo Addimihiisuna yihiin 24+16X20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAS:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Wadajir J. Siyaad

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 362 W.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 361 W.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG

Xaaji Maxamed Maye

L. 259

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saciid Xuseen Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 15.11.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna ya hay Trabesiyo Addimihiisuna yihiin 30+10X40 kuna fadhiya 800 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAS:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 284 W.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga a ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaà muddo (30) Sodon maalmood ah laga bi maalinta lagu soo qoro Buugga Fáafinta Sharciga R smiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 260

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jamaal Axmed Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 12.10.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna ya hay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAS:

Waooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 163 W.

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 141 W.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 151 W.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga smiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 261

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulle Seef Jaamac iyo Xaliima Dhoore Geedi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 15.6.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 60X16 kuna fadhiya 930 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Derbiga Baar Juungale

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Wadada Balcad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 262

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Xaashi Nuur uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 21.1.78 uu ku weydiisanayo gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna ya hay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X15 kuna fadhiya 480 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Shariif Cumar

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed

B a r i Waxaa ka xiga: Cali Lamb. 877/80

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga R smiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 263

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shirkada Caabi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 2.6.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihii 100X40 kuna fadhiya 4000 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Wadda

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Wâddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Gen.

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 264

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda Kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buuga Kaydka dhumay oo Lam. yahay 6426 lagana soo sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo kaydka Soomaaliyeed laanta 2aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 127,500 uu iska lahaa Shukri Aadan Shire sida ku cad warqadda Lam. La'aan taariikh 6.6.83, oo Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta 2aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baab'iyo (Ammartamento), Buugga keydka lam. 6426 Biis oo ku qoran magaca Shukri Aadan Shire ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 127.500

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta 2aad u beddelo Shukri Aadan Shire Buugga kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco **Faafinta Rasmiga** ee J. D. S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 6.6.83.

GUDDOOMIYAHA MAXK. GOBOLKA BANAADIR

D. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 265

WASAARADDA H. GUUD IYO GURIYEYNTA GOB.
SH. HOOSE EE DEGMADA MARKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cadar Cali Aadan. uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 18.3.83 bal dowladeed ah oo ku yaal Degmada Barawe Qaabkii suna yahay Rettangolare. Addimihiisuna yihiin 26X100 kuna fadhiya 330,00 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii dooneysa dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda H. Guud Gobolka Shabeelaha Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) Sodon maalmood oo laga bilaabahayo maalinta la soo daabaco Buugga Eaafinta Rasmiga ah:

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada Dowladda Hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Shalambood, 4.6.1983

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

INJ. Cali Maxamuud Maxamed

L. 27

WASAARADDA H. GUUD IYO GURIYEYNTA GOB.
SH. HOOSE EE DEGMADA MARKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sacad Maxamed Cabdalle uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 21.6.83 gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qobkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 12,80X16,60 kuna fadhiya 212,48 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Dhisan.

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dhisan.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo Lamaro.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo Lamaro.

Qofkii dooneysa dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda H. Guud Gobolka Shabeelaha Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) Sodon maalmood oo laga bilaabahayo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada Dowladda Hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Shalambood, 4.6.1983

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

INJ. Cali Maxamuud Maxamed

L. 28

WASAARADDA H. GUUD IYO GURIYEYNTA GOB.

SH. HOOSE EE DEGMADA MARKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saalax Saalim Saciid uu ku weydiistay arji taariikhdiisu tahay 25.5.1[illegible] gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Degmada Mark[illegible] Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihi[illegible] 14,90X11,90 kuna fadhiya 177,31MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

| | |
|---|---|
| Waqooyi Waxaa ka xiga: | Guri Dhisan. |
| Koonfur Waxaa ka xiga: | Guri Dhisan. |
| Galbeed Waxaa ka xiga: | W. ka T/[illegible] M. X. Mux/n |
| B a r i Waxaa ka xiga: | Waddo Lamaro. |

Qofkii dooneysa dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha & Dhulka ee Wasaaradda H. Guud Gobolka Shabeelaha Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) Sodon maalmood oo laga bilaabahayo maalinta la [illegible] daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada Dowladda Hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Shalambood, 4.6.1983

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG

INJ. Cali Maxamuud Maxamed

L. 29

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

HADDUU ARKAY: In Buuga Keydka dhumay oo Lam barkiisu ahaa 3079 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad ku na qoran lacag dhan Sh. So. 2.864.40 uu iska lahaa Siid Cadow Aadan. Sida ku cad warqadda lambar keedu ——— taariikhdeedu 11.4.83 ee Bankiga Ga

nacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad.
HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortomento) Buuga Kayd lam. 3079. oo ku qoran Siid Cadow Aadan ayna ku jirto Sh. So. 2.864.40.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Kowaad u bedelo Siid Cadow Aadan ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 13.4.83

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
(Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed

GUDDOOMIYAHA

Ururka Qaranka ee Iskaashatooyinka Q. iyo Adeega.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J. D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Horumarinta Iskaashatoo yinka ee Lamb. 40 Soona baxay 4.10.1973.

ISAGOO ARKAY: Sharuiga Lamb. 9 ee 18.3.1980.

ISAGOO ARKAY: Arjiga uu soo qortay Guddoomiyaha Iskaashatada «Deymo Dheer» iyo Xeergaarka Iskaashatadaas.

ISAGOO TIXGELINAYAA: Baahida loo qabo Dhisid-da Iskaashatada «Deymo Dheer» oo ka shaqeysa hawlaha dilaaleyda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Dhismaha ee hoos ku qoran:

Qod, 1aad

Waxaa la oggolaaday Dhismaha Iskaashatada «Deymo Dheer» oo laga Diiwaangeliyay, Waaxda Abaabulka iyo Diiwaangelinta ee Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed, sida uu dhigayo Sharciga Lamb. 9 ee 18.3.1980.

Qod. 2aad

Iskaashatada «Deymo Dheer» waxay yeelaneysaa Aqoonsi iyo Shakhsiyad Sharciyeed, laga bilaabo maalinta Diiwaangelinta.

Qod. 3aad.

1. Iskaashatadu waxay ku shaqeyneysaa habka ku qoran Xeer gaarkeeda, hawsheedana waxay noqon doontaa.

— Kireynta Guryaha.
— Iibinta Guryaha iyo Dhulka.
— Iibinta Baabuurta I.W.M.

2. Ajuurada Hawsheeda waxay noqo doontaa 5% oo isticmaalkeedu lagu cadeyn doono Xeer hoosaadka Iskaashatada.

3. Ajuurada hawsha waxaa bixinaaya qofka ay soo gasho Lacagta.

Qod. 4aad

Laga bilaabo maalinta ay Iskaashatada si sharci ah u Dhisantay, qof aan Iskaashatada ku jirin ama aan ka haysan aqoonsi, ma qaban karo hawsha ku qoran Q. 3ad.

Qod. 5aad

Dekereetadan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Xildhibaan Xasan Cali Macallin «Sopral»
(Guddoomiyaha Ururka Qaranka Isk. Q. iyo Adeegga).

Muq. 10 Luulyo 1983

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

GUDOOMIYAHA MAX/DA GOB. TOGDHEER BURCO

IYADOO UU ARKAY: Dacwada ku saabsan Caddeyn Jeeg Lumay.

HADDUU ARKAY: Ogoysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69, D.L. (9.9.65 Lumid Jeega Wareega ee L. yahay 667435 kuna qoran yahay Jaamac Sugule Ducaale kuna qoran tahay lacag dhan 20,000 Sh. So.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas Wareega ee kor ku xusan Jaalle Jaamac Sugule Ducaale Markii ay ka soo wareegto mudo 20 maalmood, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeega cusub ee la ssmayn doono Gacanta laga saaro Jaalle Jaamac Sugule Ducaale iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

Burco, 25.1.83

Maxkamadda Gobolka Togdheer

(Drcabdiraxmaan Sh. Maxamed)
Kaaliyaha

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO